



Ref: GW/KF-38/826/2018

Date: 30/12/2018

GO'AANKA ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE 2019-ka

- MARKUU ARKAY:** Qodobada **53aad, 54aad** iyo **55aad** ee Dastuurka Qaranka.
- MARKUU DHEGAYSTAY:** Xog-waranka **Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu** Ku iftiimiyay odoroska miisaaniyadda Dawladda ee **2019ka**
- MARKUU DHEGAYSTAY:** Xog warankii soo jeedinta iyo talooyinkii Guddi **Hoosaadka Dhaqaalaha** ee Golaha Wakiiladda.
- MARKUU KA DOODAY:** Qaybaha kala duwan ee Miisaaniyadu ka kooban tahay.
- MARKUU U CODEEYAY:** Ansixinta odoroska **Miisaaniyada Dawladda** ee sanadka **2019ka** kal- Fadhiigii **38aad** fadhigisii **30aad** ee **29/12/2018** oo ay goob joog ahaayeen **60 Mudane** oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiiladda.

WUXUU COD AQLABIYAD AH (46 COD) OO GACANTAAG AH KU
ANSIXIYAY

1. Odoroska miisaaniyada **2019** sidan qadarkeedu dhanyahay **2,334,320,463,251** (laba tiriliyan, saddex boqol afar iyo sodon bilyan, saddex boqol iyo labaatan milyan, afar boqol saddex iyo lixdan kun, laba boqol kow iyo konton shilin)

1. Faahfaahinta Dakhliga Miisaniyada 2019

No.	Magaca	Budget 2018	Budget 2019	Faraqa
1.	Miisaaniyadda Dawladda Dhexe	1,687, 000,000,000	1,823,975,720,000	136,975,720,000
2.	Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxa Banaan	115,504,536,652	160,756,179,150	45,251,642,498
3.	Miisaaniyadda Dawladaha Hoose	284,419,791,039	255,490,228,023	-28,929,563.016
4.	Miisaaniyadda Sanduuqa Horumarinta Somali-land	79,598,658,078	79,598,658,078	0
5.	Miisaaniyadda Mashruuca Baanka Aduunka	45,704,269,080		-45,704,269,080
6..	Miisaaniyadda Mashruuca JPLG	52,260,000,000	14,499,678,000	-37,760,322,000
	Grand Total	2,264,487,254,849	2,334,320,463,251	69,833,208,402

1. lifaaqyada ku lamaan ee Lagu Ansixiyey Miisaniyada:-

- b .** Lifaaqa 1aad Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guryaynta
- t.** lifaaqa 2aad Wasaaradda Horumarinta Maaliyada .
- j.** Lifaaqa 3aad Wasaaradda Arimaha Dibada
- x.** Lifaaqa 4aad Wasaarada Shaqaalaha iyo Arimaha Bulshada
- kh.** Lifaaqa 5aad Wasaaradda caddaalada iyo Garsoorka
- D.** lifaaqa 6aad Wasaaradda Horumarinta Beeraha

2. lifaaqyada ku lamaan Miisaniyada ee Goluhu Diiday ansixintooda:-

- a. Wasaaradda Horumarinta Reermiyiga iyo Deegaanka
- b. Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka
- c. Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta
- d. Wasaaradda Warfaafinta iyo Dhaqanka
- e. Wasaaradda Horumarinta Kalluumaysiga iyo xanaanada Xoolaha
- f. Wasaaradda horumarinta Biyaha

4. Lifaaqa Afaraad korarsiimo iyo kusoo darid miisaniyad

1. Madaama oo loo kordhiyay Agaasimayaasha guud ee xukuumada Gunnada in labada xoghaye guud ee Golayaasha Wakiilada iyo Guurtida loo kordhiyo intii loo kordhiyay Agaasimayaasha Guud laguna daro sanad miisaniyadeedkan 2019
2. In kaalmadda ururka naafada **DAN** lagu daro miisaniyadda 2019-ka.
3. In xadiga lacageed ee ku qoran madax xigeenka (**Sub head**) 2110303 (**Gunno Hawleed**) ee Golayaasha Barlamaanka loo wareejiyo madax xigaha **2110105**

5. Go'aamada ku lamaan ee Lagu Ansixiyey Miisaniyada:-

1. In Warbixin dhamaystiran oo faahfaahsan wasaaradda Maaliyadu kasoo gudbiso Mashaariicdii ku jirtay Miisaniyaddii 2018-ka.
2. In miisaniyadda Dawladaha Hoose laga saaro Miisaniyadda Dawlada Dhexe oo iyadana Goluhu gaar u ansixiyo.
3. In miisaniyadda 2020 hadii Allah kadhigo soo gudbinteeda la raaco muddooyinka ku xusan Xeerka Maamulka Maaliyada Qaranka .
4. In qaab qoraalka miisaniyadda wax laga bedelo isla markaana loo qoro sida miisaniyadda casriga ah.
5. In Guddida dhaqaalaha iyo Guddida daba-galka Hantida Qaranka ee Golaha Wakiiladu ay soo kormeeraan mashaariicda ku jirtay miisaniyadda 2018-ka .
6. In deeqaha caalamiga iyo mashaariicda hay'aduhu ka wadaan dalka lagu soo daro miisaniyadda 2020.
7. In 2% gobolada bari la mashaariiceeyo.

Ansixinta Miisaaniyada waxaa diiday **Labo** iyo toban Mudane (**12**), halka hal (**1**) mudane ka aamusay, Gudoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

Miisaaniyadani waxay dhaqan gelayaa marka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland soo saaro Digreetada dhaqangelinta.

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL



Baashe Maxamed Faarax
Gudoomiyah Golaha Wakiilada JSL